



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**  
**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

**KU SAABSAN**

**KALSOONI SIINTA RA'IISAL WASAARE  
M.NE CABDI FAARAX SHIRDOON "SAACID"**

A handwritten signature in black ink, appearing to read "M. Ne Cabdi Farax Shirdoon".

**Muqdisho, 17<sup>ka</sup> Oktoobar 2012**

## GOLAHA SHACABKA:

- Markuu Arkey:** Qodobka 69<sup>aad</sup> faqradiisa (2) (d) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Arkey:** Soojeedinta Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ku saabsan Soo Gudbin Magacaabis R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Dhageysatay:** Hadaljeedinta Ra'iisal Wasaaraha magacaaban M.ne Cabdi Faarax Shirdoon "Saacid";

### Qodobka 1aad:

Iyada oo ay Golaha fadhiyeen 215 (Laba Boqol Toban iyo Shan) Xildhibaan. Golaha Shacabku wuxuu Kalsooni siinta Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya M.ne Cabdi Faarax Shirdoon "Saacid" ku meelmariyey aqlabiyyada 215 (Laba Boqol Toban iyo Shan) Xildhibaan oo ayiday, iyada oo aysan jirin xildhibaan diiday ama ka aamusay.

### Qodobka 2aad:

Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaan si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer Madaxweyne, si uu u Sharci u noqdo laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda si waafqsan Qodobada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo sida kmg ah loo ansixiyey.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaan"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

